



San Diego Unified School District

EUGENE BRUCKER EDUCATION CENTER
4100 Normal Street, San Diego, CA 92103-2682

(619) 725-5506

Terry B. Grier, Ed.D.
Madaxa Waxbarashadda

Disember 2008

Mudaneyaal Waalidiin ama Dadka ardeyda masuulka ka ahow,

Maadaama uu inagu soo dhawaaday xilligii fasaxu waxaan jecelahay inaan fursadan idin ku mahad celineyo kaalintii wacaneyd ee aad ka qaadateen taageeradii aad u fidiseen ardeyda iyo dugsiyada. Qoysaska iyo dadweynaha deggan magaalada San Diego waxaan uga mahad celineyaa taageeradii ay ka geysteen barnaamijka loo yeqaano Proposition “S”, kaas oo ay boqolkiiba 68 ay cod-bixiyaashu ansaxiyeen bishan Noofember 4 teedii. Miisaaniyada dhan \$2.5 bilyan waxay inaga caawin doontaa in 180 dugsi ee ku yaal degmada aan ku dayactiro, oo aan ku cusbooneysiino, si ay ardeydu u helan jawi waxabarasho oo nabadgelyo leh.

Xilligan dayrtan waxaan ku jiraa wakhti adag oo aan aad mashquul u nahay. Ardeydeenna iyo dugsiyadeennu waxay aad ugu dadaaleyaan inay natiijooyin wacan keenaan, hase ahaatee, waxbarashadda degmada waxaa soo food saartey arrimo miisaaniyaadeed oo ka yimid xaga dawlad-goboleedka. Guddoomiyaha dawlad-goboleedka Mudane Schwarzenegger wuxuu waayo dhaweyd soo jeediyey in lacag dhan \$2.5 bilyan oo kale laga jaro ama dhimo miisaaniyada waxbarashadda badhtamaha sannadkan. Waxaan si wadajir ah ula shaqeyn doonaa Guddiga Waxbarashadda ee Degmada ee cusub si aan mudnaanta u kala siino barnaamijyada aan bixineyno, isla mar ahaantaasna, uga ilaalino inay miisaaniyadaas la jaray ay waxyeelo u geysato fasalada, intii macquul ah. Waxaan idiin xaqiijineyaa Madaxa Waxbarashadda ee Dugsiyada Middoobey ee San Diego ahaan, inaan ku dadaali doono inaan arrintaas magaalada Sacramento codkeyga ugu gudbiyo sidii ay dugsiyadeennu u heli lahaayeen miisaaniyada ku filan.

Dhammaan carruurteenna si aan ugu helo waxbarasho tayo sare leh waxaa loo baahan yahay inaan farriimo gaadhsiino madaxda dawlad-goboleedka laga soo doorto, iyo inay wada shaqeyn jaalnimo ah dhex marto macallimiinta, waalidiinta iyo jaaliyada si aan wadajir farriimahaas ugu gudbiyaan. Toddobaadyada soo socda waxaan ka shaqeyn doonaa inaan xaalada ay miisaaniyadu ku sugan tahay ee saameynta dugsiyadeenna ku leh la socodsiiino waalidiinta oo ay toos doodaas uga qeyb galaan. Fadlan waxaad la socotaa shabakada waxbarashadda degmada oo ah www.sandi.net, taas oo hadba wixii soo kordha lagu soo qori doono.

Inta fasaxa feestada lagu joro, waxaan ku rajo weynahay inaad ilmihiiinna kala hadli doontaa qiimaha wanaagsan iyo mustaqbalka wacan ee ay waxbarashaddu leedahay. Waxaan idin ku dhiiri geliyaan inaad “u mahad celisaan” macallimiinta iyo shaqaalaha kale ee ku hawlanaa waxbarashadda ubbadkiinna. Labadaas eray waa hadiyad qaali ah.

Mar labaad waxaan idiin ka mahadcelineyaa inaad carruurtiinna nagu aaminteen. Fasax wanaagsan oo caafimaad iyo farxad leh ku ciida.

Si Daacadnimo ah,

Terry B. Grier, Ed.D.
Madaxa Waxbarashadda